



Qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda ee adeegyada magaalada Helsinki 2022-2025

Qoraalka oo la soo koobay luqad faseex
ahna ku qoran

Helsinki

Magaalada Helsinki waxaay sameysay qorshe sinnaanta iyo caddaaladda adeegyada ku saabsan ee sannaddada 2022-2025.

Qorshaha waxaa lagu sheegayaa sida ay magaalada Helsinki ku talojirto inay u horumariso sinnaanta iyo caddaaladda jinsiyada ka dhaxeysa. Sinnaanta macnaheedu waxa weeyaan in dadka oo dhan ay isku qiimo yihiin. Caddaaladda jinsiyada ka dhaxeysa macnaheheedu waa in jinsiyada oo dhan ay simanyihiin.

Magaalada Helsinki waxaa u muhiim ah in qof kasta oo magaalada ku nool uu dareemo in magaalada lagu soo dhawaynayo.

Ma bannaana in cidna lagu takooro adeegyada ama waxqabadka magaalada. Qorshaha waxaa lagu fulinayaa tusaale ahaan adeegyada sooshalka iyo caafimaadka, dugsiyada iyo adeegyada dhaqanka.

Qorshuhu wuxuu leeyahay afar tiir oo magaaladu ay ku horumarinayso sinnaanta iyo caddaaladda jinsiyada.

Tiirarkaas oo ah:

- intersekshanalitiga
- in laga war hayo caadooyinka
- ka qaybqaadashada
- helidda dhow

Intersekshanalitiga

Nolosha iyo waxqabadka qofka waxaa saameeya waxyaabo badan oo kala duwan, sida jinsiga, da'da, luqadda hooyo iyo naafonimada.

Mararka qaar arrimahaasi waxaay u nugleyn karaan qofka takoor.

Qofka waxaa lagu takoori karaa tusaale ahaan in uu ka luqad duwanyahay dadka kale ama in uu kursiga naafonimada ku socdo.

Intersekshionalitigu waa qalab lagu qiimeyn karo siyaabaha waxyaabaha kala duwan ay u saameeyaan fursadaha uu qofku wax uga qayb qaadan karo ama wax u qabsan karo.

In laga war hayo caadooyinka

Caadooyinku waa malooyin ku saabsan nooca ay dadku yihiin iyo nooca ay tahay inay ahaadaan.

In laga war hayo caadooyinka waxaay kuu fududaynaysaa inaad fahamto kala duwanaanshaha oo aad qof walba si ixtiraam leh ula kulanto

Ka qaybqaadashada

Ka qaybqaadashada macnaheedu waxa weeyaan in uu qof kastaa fursad u haysto inuu ka qaybqaato qorsheyaasha noloshiisa khuseeya iyo arrimaha uu isagu xiiseeyo.

Dhammaan dadka magaalada ku nool waa inay fursad u haystaan inay saameeyaan sida magaalada Helsinki loo horumarinayo.

Helidda dhow

Helidda dhow macnaheedu waxa weeyaan in qofku uu meelaha kala duwan gali karo iyo in dhanka bulshada iyo dhaqaalaha iyo dijitalka ahba ku heli karo.

In qofka jidh ahaan wax u diidaya inuu meel

galo aanu jirin macnaheedu waxa weeyaan in dadka oo dhan ay gali karaan adeegyada. Adeegyada waa la isticmaali karaa xataa haddii kursi-shaaglaha lagu socdo tabeelooyinka hagitaankuna waa kuwo in la fahmo ay fududahay.

Helidda dhow ee dhanka bulshada

macnaheedu waxa weeyaan in adeegyada magaalada ay ka jiraan jawi furan oo ammaan ah.

Qof kasta waa la soo dhawaynayaa.



Sawirka: Maarit Hohteri

Helidda dhow ee dhaqaalaha macnaheedu waxa weeyaan in dadka dan yartu xataa inay ka qayb qaadan karaan iyo inay isticmaali karaan adeegyada magaalada.

Helidda dhow ee dhijitalka ah macnaheedu waxa weeyaan in dadka oo dhan ay isticmaali karaan adeegyada dhijitalka ah sida bogagga internetka iyo aaladaha taleefanka.

Marka adeegga internetku uu yahay mid la heli karo, waxaa lagu isticmaali karaa tusaale ahaan barnaamijka qufulka shaashadda.

Hirgalinta qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda waa lala soconayaa

Qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda waxaa ku jira 93 waxqabad oo loo adeegsanayo in sinnaanta iyo caddaaladda jinsiyada la horumariyo.

Magaalada Helsinki ayaa la soconaysa sida qorshuhu uu ugu hirgalayo adeegyada magaalada Helsinki.

Qorshuhu wuxuu shaqaynayaa illaa dhammaadka muddada guddiga magaalada ee 2021-2025. Markaas kaddib magaaladu qorshe cusub ayaay samaynaysaa.

Qorshaha oo dhameystiran waxaad ku akhrin kartaa af finnish, af iswidhish ama af ingiriis.

Cinwaanka hel.fi/yhdenvertaisuus

Helsinki